



PPS: Wararkii Cusubaa Maalintii Ugu Horeysay ee Iskuuladu Ay Xiran Yihiiin

Gacaliye Waalidiin iyo Shaqaalaha PPS,

Waxa aynu ogsoonahay in iskuuladu ay yihiiin udub dhaxaadka bulshadeena. Ilaa iyo markii ugu horeysay ee aan tixgalinta siinay suurtagalinimada in aad xirno iskuulada, iyada oo wali aan awoodi karno in aan ardaydeena siino cunta ayaa waxay ahayd higsiyada aasaasiga ah. Kooxda Addeegyada Nafaqadu marna dib ugama istaagin in ay hawshaa gutaan sababtoo ah waxay aad u aaminsan yihiiin hawshani inay tahay waajibaad saaran. Hadda iyo iminka, inta aynu ku jirno waqtigani aan hore inoo soo marin ee galiyey jahawareerka iyo walaaca dad fara badan, shaqaaluhu waxa ay qaadayaan tallaabooyin ay ku xaqijayaan in ardaydeena la quudiyo

Saaka waxaa fursad u helay qof ahaan in aan u mahadceliyo in badan oo ka mid ah shaqaalaha Addeega Nafaqadeena iyo iyada oo markii horena Madaxa Shaqaalaha Nadaafada aan u mahadceliyey. Labadani kooxoodba ee shaqlalaaha ahi waxa ay yihin safka hore ee shaqaalaheena ee muujinaya sida aan uga jawaabcelineyn xaalada xanuunka caabuqa COVID-19 todobaadada soo socda. Waxaan u haynaa mahad naf hurnimaoodaiyo addeega ay bixinayaan waqtigani adag.

Maadaama maanta ay ahayd maalintii ugu horeysay ee fasaxeeni gu'ga ee la dheeereeyey, kooxaheena nadaafada ee dhismayaasheena iskuulada. Wuxaan mahad ugu hayaa sida ay ugu foojigan yihii sidii ay u yareyn lahaayeen fayrisku inuu faafo, iyaga oo kor u qaaday shaqadooduu nadifinta taasi oo ay galinayaan waqt muhiim ah iyo dardar xoogan badan. Sidii maalintii caadiga ahayd ee ay iskuulada ka shaqeynayeen, shaqlalaheena nadaafadu aad ayey mashquul u yihinba sidii ay u sii wadi lahaayeen inay ka midho dhaliyaan sidii ay u siin lahaayeen jawi waxbarasho ardaydeena iyo shaqaalahaba. Wuxaan aad ugu mahadcelinayaan shaqaalaheena nadaafada sidoo kale muujiyey ka go'naanta iyo dareenka dheeraadka ah hawsha ay gacanta ku hayaan. Wuxaan uga mahadnaqayaan kaalinta tooska ah ee ay ka ciyaarayaan sidii ay u horumarin lahaayeen nabadgelyada iyo caafimaadka ardaydeena iyo shaqaalaha taasi oo ah mas'uuliyada ugu muhiimsan.

Waxa aan leenahay dhowr kooxood oo sidoo kale ka shaqeynaya sidii ay gargaar aad u wanaagsan oo waxbarasho u siin lahaayeen ardaydeena inta ay ku sugan yihii guryaha waqtigan ay ku jiraan fasaxa gu'ga ee la kordhiyey. Wuxaan sii wadi lahayn in aan cusubooneysiino shabakadeena iyada oo aan ballarineyno waxyaabaha dijitalka ah iyo casharo u diyaar ah ardayda. Intaas waxaa dheer, waxa aan hadda idin soo gudbineynaa macluumaadka ku saabsan cuntada iyo addeegyadii caafimaadka. Fadlan waxaad booqataa si joogta halkani pps.net/coronavirus.

Ugu dambeyn, fadlan waxa aad sameysaa dadaal kasta oo aad u gali karto inaad raacdlo looyinka la daabacay sida in aad si joogta ah gacmihiina u dhaqdaan iyo in aad ka fogaataan meelaha meelihii bulshadu waqtiga ku qaadaneysay. Wali bulsho ahaan waxaan hayaan waqtii aan hoos ugu dhigi karno sidii aanu u faafi lahayn cudurka coronavirus-ku.

Waxa aynu ku jiraan waayo aan hore inoo soo marin, laakiin waxaad ogaataa in PPS oo wada shaqeyn la leh dawlada hoose ee deegaanka iyo tani gobolkaba ay qabanayaan wixii karaankooda ah ee ay ku caawinayaan dhammaan bulshadeena sida ay xaqiiqdu tahay inta ay dhibaatadani sii socoto.

Daacadnimo,

A handwritten signature in blue ink, appearing to read "Guadalupe Guerrero".

Guadalupe Guerrero
Guddoomiyaha Waxbarashada PPS